

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Garsoorka

War-Murtiyeed

Shirka Wada-tashiga

EE

**Xeerka Dhisidda Guddiga La-dagaalanka
Musuq-maasuqa**

**Jazeera Palace Hotel
17 – 18 Febraayo 2016**

Annagoo ah ka qeyb-galayaasha shirka wadatashiga ee ku sabsanaa: Xeerka Dhisidda Guddiga La-dagaalanka Musuq-maasuqa; kana kala yimid Xafiiska Mdaxweynaha ,Xafiiska Ra'isulwasaaraha, xubno ka socda Baarlamaanka , Xafiiska Xeer-ilaalinta Guud ee Qaranka, Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda, , Maxkamadaha dalka, Maamuladda Gobollada Dalka, Hay'adda Culumada Soomaaliyeed, Ururka Qareenada, Ururka Qareenada Haweenka madaxabannaan, Ururada Bulshada Rayidka ah, Kuliyaadaha sharciga ee Jaamacadaha Dalka iyo Khubaro kale.

Annagoo ka duuleyna, tixgalinaynana baahida loo qabo in La dhiso Guddiga madax banana ee la-dagaalanka musuqmaasuqa , horumarinta iyo tayeynta hey'adaha ka hortagiida musuqa .

Waxaan soo-jeedinaynaa:

- In baahi adag loo qabo in dhiso Guddiga madax banana ee la-dagaalanka musuqmaasuqa si loo hiigsado horumar soomaaliya maadaama musuqmaasuq uu caqabad ku yahay horumarka aminiga ,dhaqaale iyo dhanka bulsho .
- Waxaan soo dhaweyneynaa hirgelinta qorshaha dib-u-habeynta hay'adaha ka hor tagao musuqmaasuqa .
- Waxaan soo dhaweynaynaa dadaalka ay wado Wasaarada Cadaaladda iyo Arrimaha Garsoorka ee lagu horumarinayo hay'adaha ka hor tagao musuqmaasuqa .
- Waxaan u mahadcelinaynaa dhamaan dadkii ka qeybqaatay diyaarinta barnaamijkan iyo kuwii dadaalka gaarka ah ka muujiyey ka qeybgalkiisa iyo hagiddiisa .
- Ugu danbeytii waxaan ugu baaqeynaa Xukuumadda Federaalka iyo Baarlamaanka Soomaaliyeed in ay ansixiyaan Xeerarka Dhisidda Guddiga la-dagaalanka musuqmaasuqa taas oo ah waajib Dastuuri ah in la dhiso .